Suugaan La'aan Waa Aqoon La'aan

A. M. Yusuf© ¦ wayeel@operamail.com

“Suugaantu waa dhaqan haddana waa sud iyo dhiibe
Dhidib iyo lud bay leedihiyo dhaabad iyo meele
Dhuuxuu ka eegaa ninkii dhilan yaqaannaaye”

Abwaan Hadraawi: Dhulgariir

“Guud ahaan … (naqdiga suugaanta) mushkilado dhawr ah
ayaa inaga haysta haddii aynu soomaali nahay …”

Hawd: Dibusocod, Abriil 23, 2006.

WAA MAXAY FAAQIDAAD?

FAAQIDAAD (NAQDI): waa baaraandeg lagu sammeynayo qoraal amaba hadal, iyada oo wadar ahaan loo eegayo xiriirka ka dhexeeyo qeybihiisa kala duwan; si qoto dheer na looga faalloonayo.

QOF KASTA OO NAGA MID AH falcelisyo ayaa ka imanayo, kuwaas oo aalaaba ka dhasho sida sheeko, maanso, iyo maadeys ay raadad ugu reebayaan dareemeha. Goorta laga doodayo qoraal suugaaneed waa in aan la illaawin**:** *suugaantu in ayan ahayn ifafaale ku saleysan waayaragti sayniseed; bal se in ay tahay waayaragti lagu halabuuray ereyo***.** Ma jiro mitir ama miisaan isla hal si' u halbeegi karayo dareenka dadka oo idil. “Qofba waa dhankuu ka arko iyo meesha uu dhigo'e” (Hadraawi: Dhulgariir) . **Isla wixii qofkeen muusannaab u lahaan ayaa qofkeen kale na muusood u yeelan**. Hadba dareenka dhegeysteyaal ama akhristeyaal sida uu u kala duwan yahay ayuu awaalkeedu na u kala duwanaan doonaa. Siyaabo kala aragti duwan ayaa wax looga qori ama looga hadli doonaa. Sidaas awgeed na, gedda xoorta caanahii geela, xiisaha loo qabo suugaanta na, marnaba, weligii ma dhici doono.

Maadaama aan kor ku soo carrabbaabay wax la yiraahdo waayaragti sayniseed iyo waayaragti suugaaneed; haddaba, si aad u kala garato waxa aan kuu soo bandhigayaa labo tusaale kuu kala qeexi doono **kalatagnaanta ay isu jirto *waayaragtidooda labanlaaban.***

Si feejigan u eeg sida aqoonyahanku uu uga hadlayo awrka geela:

Inta badan awrka geela jooggiisu waa 2 m marka garbaha laga dhereriyo. Kuruskiisu 30 cm ayuu sare uga kacsan yahay duudkiisa. Lugtiisu joog ahaan waa 1.9 m marka garbaha laga dhereriyo… Culeys gaadhayo illaayo 454 kg ayuu awrku qaadi karayaa. Hadaafkiisu qiyaastii waa 4 km saacaddiiba; waxa uu na socod ku gaari karayaa illaayo 47 km maalintii ba. Rakuubku se, celcelis ahaan, waxa uu gaadhi karayaa foogaan gaadhsiisan illaayo 161 km maalintii ba.

Tixdan soo socota waxa la adeegsanayo waa ereyo: **ma ahan rumay, iyo asal**. Si feejigan, misana mar kale bal u eeg; gedda abwaan Soomaaliyeed uu hummaag bilicsan inooga siinayo jaceylka tarmiya geela Soomaalida:

Dhabbadii carraabaha markii nabar la sii dheelmo
Dhoorwiiloow goortuu ratigu dheeho dhabar joogo
Dhudhunkeeda laafyaha markuu dhan ula boodaayo
Dhegta iyo tawaaddiyo xubnaha laysku wada dhaabay
Dhudda kuruska beerkiyo kelyaha dhibidu gaashaysay
Dhexda labada qaar noqotay iyo dhabarka soo xoodmay
Dhegeysigu micida meel cidla' ah dheef u rabinaayo
Dhufashada rakaadday farxadi kugu dhammaataaye:
Ragga laxaha sii dhawrayoow dhaqasho waa geele!

Ustaraaliye, Cumar Xaaji Xuseen: Dhaqasho waa Geel

Waayaragtida sayniseed waxa lagu qoraa tiraabo ka caaggan ***dareen***. Qof kasta oo istaawiyo in uu ka jibagaaray barashada bayoolojiga geela; waxa u sii laaban aqoon kale: *Aqoonta toolmoon ee dhoobbigii dhiqi jiray uu u leeyahay geela*. Aqoonta iyo suugaanta waa laba maatano ah asii ka sammeysan ***'hal-laba-walaxood'*** **oo isku dhaaban**. Waayaragtidooda labanlaaban, walow ay middoodba mudnaanteeda iska leeyahay -- waa sida xarar iyo madaxa lacagta oo kale. Si kasta oo ay u kala duwan yihiin; isla haddana, **waa lammaano ay wadartoodu sammeynayso hal wax oo qudh ah**. Weligaa ogsoonow. Waayaragtida aqooneed iyo waayaragtida suugaaneed, middoodna ina siinmayso -- midda kale la'aanteed -- ***suuro geel oo dhameystiran***. Sidaas daraadeed na, dhan kasta oo loo rog ba, aqoontu waa qabyo haddii ay suugaan la'aan dhacdo. Ujeeddadu waa in suugaantu na, keli ahaan, aan ay waayaragti dhammaysiran yeelanaynin. Waayaragtida suugaaneed iyo midda oqooneed ba, labaddaraadle, *waxa ka dhexeeyo qaraannimo ku saleysan kaladuwanaansho*. Waa se lammaano, weligood, sina ba aan u kala fursan doonin.

Aqoonyahanku, sidaas awgeed, waxa uu isku hawlaa baaritaanka jidhka geela; isaga oo kaashanayo mitirka, miisaanka, iyo daababka sheybaarka.
Gabyaagu se, waxa uu isku hawlaa hiddeynta taayooyinka geela. Dareenkiisa ayuu ku kaydiyaa meerisyo uu ku miisaamay jiib, ku dhudhumiyay jaan, ku na sarjaray tibixqaarro isku yeer ah. Maansada abwaanku se waxa ay dhalisaa hummaagyo, *dhawaaqoodu*, aan waana dhiman doonin. Muuqaallo, teeryo weligeed ba, dadka uga hadli doona dhaqankii -- shalay, maanta, iyo foog ba.

Weydiintu waa: afka aqoonyahan, iyo afka maansayahan kee baa xadateyn og dareemeha? Kee ayaa se, haddaa, raadad hilow badan ku qoomi og wadnahayaga? **Ratigii aqoonyahanka iyo ratigii maansayahanka**, kee ba ayaad se jecleysan lahayd in aad xusuustaada ku haysid? Ma **malloolliga** reeryada xambaarsan? Mise **awradhaleha** baatirta geela hawdka ka eryooda?

Warcelinta, adiga ayaan ba ku weydiin lahaa.

F.G. Qoraalkaan waxa laga soo dhilay qormo la yiraahdo: *Qoraaga Qoraalka Mise* . Horey ayuu na ugu soo baxay degellada qaarkood. La soco qeybaha ku soo xiga.

_____

.

.

.

A. M. Yusuf© (wayeel) ¦ wayeel@operamail.com